

Xeerka Golaha Sare Kacaanka 24 Janaayo 1970, lamba. 41.

Ansixinta Heshiiska fulinta Xeer Hoosaadka Midawga Boostada Afrika

GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Xaashida Koowad Kacaanka;
Marka uu arkay Heshiiska iyo Xeer Nidaamiyaha fulinta Midawga Boostada Afrika;
Marka uu garowsaday in ansixinta dokumentiyada kor ku xusan ay ka dhalanayaan waajibaadyada ku xusan miisaaniyadda iyadoo lacagta lagu biirayo Midawga Boostada Afrika ay ku jirto miisaaniyadda Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Gaadiidka;
Marka la xaqiijiyay baahida loo qabo in Heshiiska iyo Xeer Nidaamiyahiisa fulinta Midowga Boostada Afrika la ansixiyo;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Waxaa si buuxda loo oggolaaday oo la ansixiyay dokumentiyada xagga hoose ku taxan oo ay saxiixeen midka Dawladda Soomaaliya ay awooda u siisay, inta uu socday Shirweynaha Midawga Boostada Afrika ee ka dhacay Qaahira 14 Abriil 1969:

1. — Heshiiska Midowga Boostada Afrika;
2. — Xeer Nidaamiyaha fulinta Heshiiska Boostada Afrika.

Maamulka Boostada Soomaaliya ayaa ka masuula fulinta xeerka ku jira dokumentiyada la soo sheegay.

Qod. 2

Qoraalka Rasmiga ee dokumentiyada la saxiixay iyo la keydinayaa waxaa laga helayaa Xaafiiska Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 24 Janaayo 1970.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre